Dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Guud ahaan dadka cudurkan qaba waa in loo gartaa loona fahmo arrimahooda si ka khoto-dheer sida dadka caadiga ah. Badanaan way adag tahay in la fahmo ama la turjumto calaamaha aanan la taaban karin sida nambaradda iyo xuruufta.

Way adag tahay in la qorsheeyo, lala socdo, lalana qiimeeyo dabeecadahooda/ dhaqamadooda marka laga eego xaalado kala duwan. Tani macnaheedu waa in aay ugu yaraan aay adagtahay in lala qabsado, la qiimeeyo waxna laga bedelo dabeecadahooda. Nolosha maalinlaha ah waxay muujineysaa in aay ku adkaan karto hor-usocosho iyo go'aan qaadasho la xirirta marka aay dhamaaneyso.

Inta badan dadka cudurkan qaba waxay u baahan yihiin taageero inta noloshooda ka dhiman si aay u maamulaan nolol-maameedkooda. Kuwa badan oo ka mid dadkaas ayaa koox koox u deggan una nool si isku mid ah. Halka qaar ka mid ahna aay wax xoogaa nolol isku-filnaasho ah aay ku nool yihiin, aayna haystaan guri u gaar ah lanase taageero.

Qofka qaba cudurka koriin-yaridda maskaxda wuxuu sameeyaa isbedel, qofkaasi wuxuu la kulmaa khibrado cusub wuxuuna u baahan yahay isbedel. Taasi macnaheedu waa in caawinaada la siiyo dib looga fekero loona bedelaa si joogta ah si aay caawinaadaasi waxtar u yeelato kana qeyb qaadato horumarka qofka.

Xakhiikhada ku saabsan ilmaha garaadka dhiman

Fakta om utvecklingsstörning

Somaliska

Habilitering & Hälsa
STOCKHOLMS LÄNS LANDSTING

Box 17056, 10462 Stockholm
Tideliusgatan 12. Rosenlund, plan 7
08-123 350 10
08-123 496 32
www.habilitering.nu/forumfunktionshinder

Koriin-yarida maskaxdu xanuun kaas oo saameeysa garaadka iyo awooda qofka si ay ula qabsadaan ama u fahmaan nololshooda maalinle. Waxaa jira heerar kaladuwan ee cudurkaan garaad-yarida maskaxdu (utvecklingsstörning) leeyahay: ilaa xad qofku uusan kaligiis noolaan karin in la caawiyo ma ahane.

Dadka cudurkan garaad-yarida maskaxda qaba waa shaqsiyaad nooc gaara ah lehna shaqsiyad, itaal, hibo, tabar, daciifnimo iyo baahiyo u gaar ah, sida dadka caadiga ahba ay leeyihiin. Sikastaba ha ahaatee cudurkan garaad-yarida maskaxda (utvecklingsstörning) macneheedu waa heer koriimo maskaxeed hooseeya xilliga caruurnimada iyo ila xiliga dhalinyaranimada taas oo marka danbana sii socota inta nolosha ka dhiman. Tani waxaay keeneysaa caqabado ku yimaada fahamka iyo fikirka si qofka garaadkiisu u dhismo oo uu wax soosaar u lahaado.

Caqabadahan waxay keenaan garaad yari iyo laqabsi la'aan maskaxeed. La qabsiga maskaxeed waa awooda uu qofka kula qabsan karo degaanka ku xeeran iyo awooda uu ku maamulo nolol-maalmeedkiisa, tusaale ahaan, in qofku maamulo hoygiisa (gurigiisa) iyo hantidiisaba (lacagtiisa).

Boqolkiiba hal (1%) oo mid ah dadyowga ayaa qaba xanuunka koriin-yaridda maskaxda. Waana caadi in qofka isagoo qaba xanuunka koriin-yaridda maskaxda hadana uu qabi karo xanuunno kale sida dhaq-dhaqaaqu ku adag yahay, cerebral pares (waa xanuun qeybo kamid ah cuuryaamiya taasoo aay sabato dhaawac xagga maskaxda ah, waxayna sababtaa cuuryaanimo timaama caruurnimada iyo marka la weynaadaba), autism, iyo naafo xagga aragga iyo maqalka ah.

Halkii laga dhihi lahaa koriin-yari maskaxeed (utvecklingsstörning) waxaa la isticmaali karaa mararkaa qaar howl-gab maskaxeed, garaad-yari maskaxeed, Cuuryaanimadda xagga koridda caqliga ah eller cuuryaamid xagga nafsiyadda ah.

Qaabka loo baaro/ogaado xanuunkan

Si loo ogaado xanuunkan koriin-yaridda maskaxeed, waxaa la sameeyaa baaritaan ka dheeri ah kan dhaqtareed iyo kan cilmi nafsi ahaaneed. Baaritaanka ugu badan ee la adeegsado waa mid qoraaled (bug daabacan) loona yaqaan DSM-IV-TR – (Diagnostic and Statistical Manual of Mental Disorders). Baaritaankan marka la sameynayo cudurkan waxaa loo adeegsadaa ereyga mental-retardation.

Habka baaritaanka iyadoo la adeegsanayo DSM-IV-TR waa:

A. Heerka shaqadda maskaxeed oo uu si aad ah uga hooseyo sida caadiga ah, tusaale ahaan halki IK- qiimahiisu yahay 70 ama ka yar.
B. isla markaas, hadii aaysan jirin ama yaraato awoodda laqabsiga shaqadeed ee ugu yaraan laba ka mid ah qeybahan soo socda: Xiriirka, ADL-färdigheter (qofka waxa uu awoodi karo marka uu jiranyahay), degaanka, bulshada, ka faa'iisashada ilaha guud, hiigsashada mowqif, waxbarashada, shaqada, xilliyada firaaqada, caafimaadka iyo baddaadada shaqsiyadeed.
C. bilaabata 18 sano jir ka hor.

Buuggan wuxuu xanuunka koriinka-yarida maskaxda u kala saaraa dhowr qeybood, mid fudud (IK 55-70), mid dhex-dhexaad ah (IK 40-55), mid daran (IK 25-40) iyo mid aad u daran (IK <25), iyadoo lagu saleynayo heer ka caqliyadeed ee maskaxda marka la sameeyo baaritaanka.

Doodo ayaa ka taagan sida loo adeegsan karo qeybahan, waxaa kaloo jirto qaaciddo kale taasoo la xiriirta xanuunkan koriin-yarida maskaxda oo aay soo saareen AAMR American Association on Mental Retardation (waa urur mareykan ah oo ka shaqeeya xanuunka garaad-yaridda maskaxda). Qaacidadan waxay la mid tahay tii DSM-IV-TR, laakiin waxay kaloo muujineysaa in garaad-yaridda maskaxda aaysan ahayn oo kaliya mid shaqsiyadeed balse aay tahay in loo arko in aay la xiriirto xaaladaha ka jira degaanadda ku xeeran qofka qaba xanuunkan. Tani waxay macnaheedu tahay in qofka uu qabi karo in ka badan ama in ka yar tan aay baaristu sheegtey, waxayna ku xiran tahay hadba sida aay tahay xaaladda degaanka uu qofka ku nool yahay iyo jawaabaha aad ka heleyso.

Sababaha keena xanuunka

Waxyaalo badan ayaan keena xanuunkan sida dhaxaltooyo, cilad hidasidanimmo, dhaawac ama xanuuno jirey waqtigii/xilligii uur-kujirka uu ahaa ama waqtiguu dhalanayey. Dhaawacyada iyo xanuunada xilligii caruurnimada ama dhalinyaranimada gaaray ayaa sidoo kale maskaxda dhaawici kara taasoo sababi karta xanuunka garaadn-yarida maskaxda. Downs syndrome (waa xaalad la dhaxlo keentana in korriinka maskaxda daahdo) ayaa ah calaamadaha ugu badan ee keena xanuunka garaad-yaridda maskaxda. Maanta cudurkan waxaan ka naqaanaa in ka badan intii horey looga yaqaanay. Laakiin mar walba ma heli kartid sababta rasmiga ah ee keenta in qof maskaxdiisu koriinkeedu yaraado.

Caruurta

Koriin-yarida maskaxda laf-ahaanteedu ayaa la arkaa in siyaanbo kala duwan aay u heysa caruur kala duwan. Caruurta qaba cudurkan waxay u koraan sida caruurta kale ee kuwada nool meela kala duwan, laakiin qaata waqti dheer in aay maskax ahaan u koraan. Baahida aasaasiga ah iyo dareenkooduba waa sida caruurta kale, lakiin caruurta cudurkan qabta waay ku adag tahay in aay gudbiyaan/muujiyaan baahidooda. Caruurta uu cudurka sida daran uu u hayo waxay guud ahaanba lumin karaan hadalka, laakiin caruurta uu cudunkan sida fudud u hayo waxay badanaa ka daaha ku hadalka luqadda iyo barashadeeda. Hadaba waxaa loo baahan yahay awood/karaan lagu tarjuman karo laguna fahmi karo xiriirka uu ilmuhu sameynayo. Mararka qaar waxaa loo baahanayaa in la isticmaalo waxyaalo (qalab) taageero dheeraada ah sida luqad-sumadeed (luqadda dhagool-ayaasha ee faraha laga hadlo) ama muuqaallo (sawir ahaan). Caruurta naafadda ka ah xagga waxbarashada waxay uga baahan yihiin dadka qaan gaarka ah taageero iyo dhiira gelin dheeraad ah in ka badan caruurta kale.